

Waa maxay FSET?

FoodShare Employment and Training (FSET) (Barnaamijka Shaqada iyo Tababarka ee FoodShare) waa barnaamij bilaash ah ee caawiyaa xubnaha FoodShare inay dhisaan xirfadaha shaqada, helaan shaqooyin, oo hormariyaan xirfadaha.

FSET waxay qiimeyneysaa kartiyadaada, baahiyada, iyo doorbiditaanka laguugu caawinayo inaad shaqo heshid.

Si aad wax badan uga baratid barnaamijka FSET, booqo www.dhs.wisconsin.gov/foodshare/fset.htm.



Bayaanka Takoor la'aanta

Sida uu dhigayo sharciga madaniga ee U.S. Department of Agriculture (USDA) (Wasaaradda Beeraha ee Mareykanka) ee nidaamka madaniga ah iyo xeerarkiisa hay'adda USDA, hay'adaha hoos yimaada, xafiisyadiisa, iyo shaqaalahaooda, iyo hay'adaha ka qeyb qaadanaya barnaamijyada ay maamusho USDA waxaa ka reeban in ay sameeyaan heyb sooc ku dhisan qowmiyadda, halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan, jinsiga, diinta uu aaminsan yahay, naafanimo, da'da, cidda uu siyaasadda raacsan yahay in loogu geysto aargoosasho mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada madaniga ah ee maamusho ama maalgeliso USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo xiriirka macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan Qoraalka camoolaha, daabacaada weyn, cajalada dhageysiga, Luqadda Aastaanta Mareykanka, iwm.) waa inuu la soo xiriiira Hay'ada (Gobolka ama deegaanka) halka ay ka codsadeen faa'idooyin. Shaqsiyaadka maqalka la'a, ku adag dhageysiga ama qabaa curyaanimada hadalka waxay kula xiriiri karaan USDA dhinaca Adeega Xiriirka Faderaalka ee (800) 877 8339. Intaa waxaa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu diyaarin karaa luuqadaha aan ka aheyn Ingiriiska.

Si aad u soo gudbiso cabasho ku saabsan barnaamijka, buuxio foomka cabashada ee [USDA Program Discrimination Complaint Form \(\)](https://www.ascr.usda.gov/filing-program-discrimination-complaint-usda-customer), (AD-3027) oo aad ka heleyso barta internetka: <https://www.ascr.usda.gov/filing-program-discrimination-complaint-usda-customer>, iyo xafiis walboo USDA, ama warqad u soo qor USDA oo ku sheeg warqada dhammaan macluumaadka aad ku codsatid foomka. Si aad u codsatid koobiga foomka cabashada, soo wac (866) 632 9992. Soo gudbi foomkaaga oo dhameystiran ama warqad ku socoto USDA xiliga:

- (1) boostada: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) fakiska: (202) 690-7442; ama
- (3) i-meelka: program.intake@usda.gov.

Machadkaan waa bixiyaha fursad simman.



**WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES**

Division of Medicaid Services
P-02103SO (04/2018)



FSET

FoodShare Shaqada iyo Tababarka

Sida loo Codsado FoodShare

Si markaas looga qeybqaato barnaamijka FSET, waa inaad heleysaa faa'idooyinka FoodShare. FoodShare waxay ku caawisaa dadka lacag xadidan ku iibsadaan cuntada ay ugu baahanyihiin caafimaad wanaagsan.

Haddii aadan helin FoodShare laakin inay kuu suurtoqasho sabata daqliga hooseeyo ama shaqo la'aanta, waxaa jiro dhoor qaabab ee lagu ogaado:

Onleenka

Waxaad ka codsan kartaa onleenka [access.wi.gov](https://www.wisconsin.gov). Riix "Apply for Benefits" ("Codso Faa'idooyinka").

Soo wac

Waxaad soo wici kartaa hay'ada deegaankaaga. Si aad u heshid lambarka taleefonka ee hay'adaada, ka soo Adeegyada Macaamiisha 1-800-362-3002.

Qof ahaan

Waxaad u codsan kartaa qof ahaan. Si aad u heshid ciwaanka hay'ada aagaaga, ka soo wac Adeegyada Macaamiisha 1-800-362-3002 ama booqo www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm.

Sida loo Helo u Gudbinta FSET

Miyaad hadeer heshaa FoodShare?

Haa

La xiriir barnaamijka gobolkaaga FoodShare oo weydii in lagu gudbiyo FSET. Si aad u heshid lambarka taleefonka ee hay'adaada, ka soo Adeegyada Xubinta 1-800-362-3002.

Maya

Waa inaad codsataa oo lagu ansixiyaa FoodShare ka hor inta aan lagu gudbin FSET.



Adeegyada FSET Ay bixiyo

Tababarka Shaqada

Tusaalooyinka tababarka aad ka qeybqaadan kartid:

- Caawinta xanaaninta shahaadeysan (CNA)
- Darawalka Xamuul qaadaha
- Adeega macmiilka
- Xakameynta lambarada kumbiyuutarka (CNC)

Waxbarashada

FSET waxay bixin kartaa noocyada xiggo ee adeegyada waxbarashada:

- Dibloomada waxbarashada guud (GED)
- Dibloomada u dhiganto dugsiga sare (HSED)
- Shahaadada la xiriirto ee shaqooyinka sareeyo dalabka
- Ingiriiska sida luuqada labaad

Ku caawinta Shaqo Raadinta

- Warqada kore iyo siifiiga
- Xirfadaha wareysiga
- Jaheynta shaqada

Caawin Kale

FSET waxaa u suurtoqali karto inay kugu caawiyaan qarashaadka la xiriirto shaqada sida:

- Boonooyinka baska ama lacagta shidaalka.
- Dharka wareysiyada.
- Labisyada loogu talagalay tababarka ama shaqada.
- Qalabyada shaqada.

